

Xuquuqaha Shaqaalaha

Shaqaalaha uu caymiyay Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka waxaa la siiyaa xuquuqo gaar ah oo ay ku midoobaan si loo hagaajiyo mushaarkooda iyo xaaladaha shaqada, oo leh mise aan lahayn urur.

Howlaha Ururka

Shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin inay isku dayaan inay sameystaan urur oo aan hadda jirin, mise inay kala noqdaan aqoosiga urur waayay taageerada shaqaalaha.

Tusaalaha xuquuqaha shaqaalaha waxaa kamid ah:

- Sameynta, mise isku dayga, urur ku yaal goobahada shaqada;
- Ku biirista urur haddii ururku uu aqoonsanyahay cidda aad u shaqayso iyo in kale;
- Ka caawinta urur shaqaale habaynta shaqaalahaaga;
- Diidmada in la sameeyo mid mise dhammaan waxyaabahan.
- Inuu si cadaalad ah u matalo urur

Howlaha Kabaxsan Ururka

Shaqaalaha aan sidoo kale matalin urur waxay leeyihiin xuquuq hoos timaada NLRA. Gaar ahaan, Guddiga Xiriirka Shaqaalaha wuxuu ilaaliyaa xuquuqda shaqaalaha si ay ugu lug yeeshaan “hawlahada wadajirka ah”, taas oo ah marka laba mise in kabadan shaqaale ay qaadaan tallaabo gargaarkooda ay wadaagaan mise ilaalinta wadajirka ee kusaabsan shuruudaha iyo shuruudaha shaqada. Shaqaale kali ah ayaa sidoo kale suurtagal ah inuu galo hawlo wadajir ah oo ilaashan haddii isaga mise iyada uu ku dhaqmayo awoodda shaqaalaha kale, oo markaa u keenaysa cabashooyinka kooxda dareenka shaqo bixiyaha, isku dayaya inuu kiciyo ficil kooxeed, mise raba inuu isu diyaariyo fal kooxeed.

Tusaalayaal dhowr ah oo ah waxqabadyada wadajirka ah ee la ilaaliyo waa:

- Laba mise in kabadan oo shaqaale ah oo kala hadlaya shaqo bixiyahooda wax kusaabsan kordhinta mushaarkooda.
- Laba ama in kabadan oo shaqaale ah ayaa ka wada hadlaya arrimo shaqada la xiriira misena kabaxsan mushaharka, sida walwalka badqabka, midba midka kale.
- Shaqaale la hadlaya shaqo bixiyaha isagoo ka wakiil ah hal mise in kabadan oo saaxiibo shaqo ah wax kusaabsan hagaajinta xaaladaha goobta shaqada.

Macluumaad intaa kabadan, oo ay kujiraan sharraxaadda kiisaska waxqabadka dhabta ah ee la isku raacay, [waxaa laga heli karaa bogga waxqabadka la ilaaliyay.](#)

Yaa la ceymiyay?

Badanaa shaqaalaha waaxda gaarka loo leeyahay waxaa ceymiya NLRA. Haseyeeshee, Xeerku wuxuu si gaar ah uga reebaa shakhsiyaadka:

- ay shaqaaliisay fadaraalka, gobolka, mise dowladda hoose
- loo shaqaaleysiiyay sidii beeraleey
- loo shaqaaleysiiyay adeegga guriga ee shakhsi kasta mise qoys kasto oo guriga jooga
- loo shaqaaleysiiyay waalidka mise xaas
- loo shaqaaleysiiyay sii kunturaadle madaxbanaan
- loo shaqaaleysiiyay sidii kormeere ahaan (kormeerayaasha loo takooray inay diideen ku xadgudubka NLRA ayaa la ceymintaa karaa)
- uu shaqaaleysiiyay shaqo bixiye kuxiran Xeerka Shaqada Tareenka, sida wadada tareenada iyo diyaaradaha
- uu shaqaaleysiiyay qof kale oo aan aheyn shaqa bixiyaha sida lagu qeexay NLRA

Macluumaad itaa kabadan [waxaa laga heli karaa bogga heerarka xukunka.](#)

Wixii Macluumaad Dheeraad ah:

Haddii aad qabto weydiimo dheeraad ah:

- Eeg bogga [Weydiimaha Badanaa la weydiiyay.](#)
- Hubi qaybteena isdhexgalka sharciyada la ilaaliyay ee [Xuquuqaha Shaqaalaha.](#)
- La xiriir Xafiiska Arrimaha Dadweynaha [202-273-1991](#) mise mid kamid ah [xafiisyadeenna 26-ka gobol.](#)

Haddii aad diyaar u tahay inaad xareyso dacwad mise Codsii, waxaad sidaas ku sameyn kartaa adigoo u maraya [Arjiga xaraynta elektarooniga ah \(E-File\).](#) ee NLRP.